Macluumaadka xiriirka muhiimka ah



Xafiisyada LD/CPS ee gobolka oo dhan

GOBOLKA 1-AAD
316 W. Boone Ave.,
Ste 500
Spokane, WA 99201

GOBOLKA 2-AAD
1002 N. 16th Ave.,
Yakima, WA 98902

GOBOLKA 3-AAD
8625 Evergreen Way,
Ste 250
Everett, WA 98208

GOBOLKA 4-AAD
4045 Delridge Way SW,
Ste 201
Seattle, WA 98106

GOBOLKA 5-AAD
1949 S. State St.,
Tacoma, WA 98405

GOBOLKA 6-AAD
6860 Capitol Blvd. SW,
Bldg #2
Tumwater, WA 98501

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid baaritaanka, nagala soo xiriir barta **dcyfdlliccpsfcadministrativestaff@dcyf.wa.gov.**

Loogu talagalay oo kaliya Korinta iyo Daryeelayaasha Xigtada ah

Foster Intervention and Retention Support Team (Kooxda Taakuleynta Barbaarinta ee Waalidka Koriya Carruurta ay hayaan, FIRST) waa adeeg taageero la isku hallayn karo oo waalidka ka caawiya korinta iyo daryeelayaasha xigtada si loo bixiyo taageero inta lagu jiro baaritaannada/ LD/CPS. Waxay kaloo bulshada u gudbiyaan meelo kale oo muhiim ah. Waxaad xafiiska FIRST kala soo xiriiri kartaa 866-393-6186.

Shaqaalaha Xannaannada Carruurta waxay eegi karaan barta internet-ka DCYF si ay uga helaan maacluumaad iyo taageero **www.dcyf.wa.gov**.

Washington State Department of Children, Youth & Families
Licensing Division
1500 Jefferson St. SE
Olympia, WA 98501

Haddii aad tahay qof naafo ah islamarkaana aad ka walwalsantahay xuquuqahaaga sida uu dhigayo Xeerka Naafada Ameerika, fadlan eeg daabacaadda *Wargelinta Shacabka ee Bilaa Takoorka ee ADA/504* (ADM_0026) wixii macluumaad dheeraad ah iyo tilmaamo ku saabsan sida onlayn cabasho looga xareeyo **www.dcyf.wa.gov/publications-library/ADM_0026**.

*Haddii aad rabto nuqullo bilaash ah oo daabacaadan ah oo ku qoran qaab mise luqad kale, fadlan kala xiriir Xiriirka Macaamiisha DCYF lambarka 1-800-723-4831 mise iimayl u dir **communications@dcyf.wa.gov**.*

DCYF PUBLICATION LIC_0002 | DSHS 22-452 SM (02-2026) Somali

Dambi baarista Xannaannada Gobolka ee Adeegyada Ilaalinta Carruurta

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Licensing Division/Child Protective Services (Waaxda Shati bixinta/ Dambi baarista Adeegyada Ilaalinta Carruurta, LD/CPS)

DCYF's LD/CPS waxay ka jawaab calisaa warbixinnada xadgudubka mise dayaca carruurta iyo dhallinyarada. Warbixinnadani waxay ku lug leeyihiin dadyow mise meelo ay gobolku shati u siisay si ay u daryeelaan carruurta iyo dhallinyarada. Tani waxaa kamid ah guryaha lagu koriyo carruurta, kooxda mise xarumaha daryeelka la dego, guryaha daryeelka ilmaha qoyska, xarumaha daryeelka ilmaha, xarumaha ay dawladu maamusho, iyo shaqaalaha ka shaqeeya halkaas.

Marka uu qof aamino in ilmo mise dhalinyaro lagu xadgudbay mise la dayacay, waxay wici karaan DCYF si ay uga warbixiyaan eedeynta. Qof kastoo aaminsan in ilmo lagu xadgudbay mise la dayacay wuxuu wici karaa 1-866-363-4276 mise 9-1-1 si uu u sheego. Haddi eedayntu ka dhacdo xarun dawladu maamusho, u shatiyaysan in lagu xannaaneeyo carruur, mise laga doonayo inay lahaato shati, kiiska waxa loo xilsaarayaa LD/CPS si ay u baarto. LD/CPS waxay baartaa eedeymaha xadgudubka jirdilka, xadgudubka galmada, dayacaadda iyo/mise si xun ula dhaqanka, bahdilka, galmada, tahriibinta, iyo dilka carruurta.

Maxaa dhaca marka LD/CPS baarto eedaymaha xadgudubka mise dayaca ilme mise dhallinyaro?

Dambi baaruhu wuxuu:

- Wuxuu la xiriirayaa booliska, haddii ay lagama maarmaan tahay.
- Wareysan doonaa dhibbaneyaasha la soo sheegay.
- Kugu wargelin doonaa eedaymaha sida ugu dhakhsaha badan kullamaa aanay saamayn dambi baaraha.
- Ku siin doonaa fursad aad uga jawaabto eedda.
- Wuxuu wareysanayaa markhaatiyaasha iyo dadka kale ee macluumaad ka hayn kara eedda.
- Booqan doonaa xarunta si uu dib ugu eego faylasha, siyaasadaha, iyo si aad u qiimeyso xarunta.
- La tashan doonaa khabiir haddii ay lagamamaarmaan tahay.
- Muddo kooban ku dhammaystiri doonaa baaritaanka. Hadafkeennu waa inaan ku dhammaystirno baaritaanada 60 maalmood gudahood, balse waxay qaadan kartaa ilaa 90 maalmood mise ka badan haddii sharci fulinta ku lug yeeshaan. Haddii aad ka walwalsantahay wakhtiga ay arrintan qaadaneyso, fadlan la soo xiriir maamulaha LD/CPS ee deegaankaaga.
- Go'aami in ilmo mise dhalinyaro lagu xadgudbay mise la dayacay si waafaqsan sharciga gobolka.

Waa maxay natiijada?

Baaraha LD/CPS ayaa go'aaminaya in eeddu ay sare u qaadayso heerka xadgudubka mise dayaca sida uu qeexay sharciga gobolka ee RCW 26.44.020. Dacwa kasta waa faldanbiyeed la xaqiijiyay mise mid aan la xajiijin.

Sal leh waxaa loola jeedaa: Marka loo eego xogta la hayo, waxay aad ugu dhowdahay in xadgudubka mise dayaca ay dhaceen.

Aan sal lahayn: Marka loo eego xogta la hayo, waxay aad ugu dhowdahay in xadgudubka mise dayaca aanay dhicin, mise aanay jirin caddayn ku filan oo lagu go'aamiyo in xadgudubka la sheegay uu dhacay iyo in kale.

Marka baaritaanka dhamaado, waxaa laguu soo diri doonaa warqad kuu sheegaysa in natiijada la xajiijiyay iyo inkale. Haddii eedda lagugu helo, waraaqdda ayaa kuu sheegeysa sida aad racfaan uga qaadaneyso jawaabta iyo wakhtiga racfaanku soconayo.

Xitaa haddii eeddu tahay mid aan sal lahayn, shati bixiyahaaga mise maamulka barnaamijka ayaa laga yaabaa inay kaala shaqeeyaan sidii wax looga qaban lahaa wixii walwal ah ee la ogaado inta baaristu socoto.

LD/CPS waxay sidoo kale awood u leeyihiin inay dhammaystiraan baaritaannada halista ah oo kaliya. Baaritaanka halista kaliya ayaa qiimeyn doona halista hadda iyo ta mustaqbalka ee carruurta iyo dhallinyarada xarunta.

Marka lagu gudajiro baaritaanka waxaad:

- Yeelan kartaa qof kale oo qaangaar ah oo aan ku dhinac ahayn kooxda baaritaanka inuu kula joogo wareysiga. Waa inaad saxeexdaa foom ogolaansho si macluumaadka loo wadaago.
- Diidi kartaa in lagu wareysto. Haddii aad diiddo in lagu wareysto, LD/CPS ayaa baaris sameyn doonta adigoon waxba u sheegin haddii aanad soo gudbin jawaab qoraal ah kahor intaan la dhammaystirin baaritaanka.
- Sii jawaab qoraal ah eedeymaha wakhti kasta, oo la wadaag dukumeenti kasta oo khuseeya baaritaanka. CPS ayaa ku dari doontaa faylkaaga.
- Waxaad ka codsan kartaa si dadka loogu sii shaaciyo barta **dcyf.publicdisclosure@dcyf.wa.gov**.

Yaan la xiriiri karaa haddii aan su'aal ka qabo baaritaanka?

Haddii aad ka walwalsantahay sida kiiskaaga loo maareeyay, fadlan marka hore la xiriir kormeeraha baaraha. Haddii aad mooddo in arrinta aan la xallin, la xiriir maamulaha aagga kormeeraha.

Si aad mar kasta caawimaad u hesho waxaad mar kasta Office of Constituent Relation (Xafiiska Xiriirka Dadweynaha) kala xiriiri kartaa lambarka 1-800-723-4831.

– ama –

Waxaad kala xiriiri kartaa Office of the Family & Children's Ombuds (Xafiiska Dhexdhexaadinta Qoyska & Carruurta)* lambarka 1-800-571-7321.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada gobolka ee xukuma LD/CPS, fadlan booqo RCW 26.44.020: **https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=26.44.020** iyo WAC 110-30: **https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-30**

** Wakaaladdan way ka duwantahay DCYF waxayna awood u leedahay inay baarto wixii walwal ah ee khuseeya DCYF.*